# Waa maxay shahaado legal aid?

Haddaad tihiin reer Ontario dakhligoodu hooseeyo, waxaa laga yaabaa inaad u qalantaan shahaaddo Legal Aid Ontario (LAO). Waxaad u geyn kartaa ama aad u diri kartaa shahaaddada LAO ay bixisay qareen meherad gaar loo leeyahay oo aqbala kiisaska gargaarka sharciyeed. Haddii qareenku uu ka soo jawaab celiyo shahaaddada, isaga ama iyadu waxay oggolaadeen inay wakiil kaa noqdaan saacado cayiman, dacwad sharciyeed ilaa iyo kiis maxkamadeed.

## Sida loo isticmaalo shahaaddadaada

Waxaad shahaaddadaada siin kartaa qareen kasta oo aad doorato oo aqbala shahaaddooyinka gargaarka sharciga (qareennada oo dhan ma wada aqbalaan). Shahaaddadaas waxa loogu talagalay arrin ama kiis gaar ah —ee looguma talogalin arrimo sharciyeed ee mustaqbal hadday soo baxaan.

# Nala soo xiriir

Telefoonka gudaha Toronto **416-979-1446**

Wicitaan lacag-la'aanta ah **1-800-668-8258**

**www.legalaid.on.ca**

## Waxa aad ka filanayso qareenkaaga

**Qareenkaagu waa inuu:**

- ✔ si dhammaystiran uu dib ugu eego arrintaada gaarka ah ama uu kuu sharaxo wxyaabaha aad kala dooranayso
- ✔ kuu hadlo oo uu kaa caawiyo inaad hesho waxaad xaqa u leedahay, iyada oo salka sharciga ku haysa
- ✔ kula soo xiriiro oo kula socodsiiyo halkuu marayo kiiskaagu
- ✔ horay kuugu sheego markay tahay inaad dib ugu soo noqoto maxkamadda iyo sababtaba
- ✔ kuu diyaariyo dhageysii kasta ama imaasho kasta oo maxkamad
- ✔ kaala taliyo marka qof kale uu imanayo maxkamadda dhinaciisa isaga ama iyada, oo ah inuu hubiyo in qofkaasi uu u qalmo hawsha oo diyaar yahay
- ✔ ku siiyo adiga macluumaadka lagula xiriirayo isaga/iyada ama qof kale oo aad wacdo haddii aad isaga/iyada heli weydo
- ✔ inuu adiga si sharaf iyo xurmayn leh kuula dhaqmo
- ✔ haddii aad tahay qof naafanimo leh, u waafajiyo baahidaada
- ✔ u dhaqmo si hawl-yaqaanimo.

## Soo wac waaxdayada cabashooyinka

Qareenada inta ugu badan ayaa bixiya adeeg hawlyaqaan ah, oo tayo leh. Haddii, hase yeeshe, aad la kulanto midkoodna arrimaha hoosta ku yaal, fadlan la soo xiriir Waaxdayada Cabashooyinka, telfoon ahaan **416-204-7104** ama **1-866-874-9786**, ama iimayl ahaan **complaints@lao.on.ca**:

- ✘ lagu weyddiisto lacag hab yaraate; fojarkaaga xaq ugu siinaya in qareenkgaa lacagta ay siiso LAO
- ✘ loo dhaqmo, iyada oo la isticmaalo erayo iyo ficillo aan habboonayn, hab adiga si aan ficanayn ku dareensiiya
- ✘ si aan loo baahnayn kuugu dedejiya inaad go'aan gaarto
- ✘ dammaand kaaga qaada guul (qareenna sidaas ma samayn karo).



Legal Aid Ontario
Aide juridique Ontario

# Helitaanka qareenka habboon ee gargaarka sharciga

Baro sida loo helo hawl-yaqaankan muhiimka ah, waxa isagu ama iyadu ay ka qaban karaan kiiskaaga, iyo sida looga faa'iideysto xiriirkiina.

## Helitaanka qareen legal aid

Waxa jira dhowr siyaabood oo lagu helo qareen. Waxaad, tusaale ahaan:

- aadi kartay aaladdayada helitaanka qareenka (**legalaid.on.ca/find**), oo ku qor goobta aad joogto iyo mowduuca sharci ee aad caawimada ugu baahan tahay; waxaad heli doonta toban qareen oo aaggaaga ka jira
- markaaad leedahay imaasho maxkamad, weyddiiso qareenka maxkamadda dadka caawiya (ee waliba loo yaqaan qareen la-taliye goob-joog) inuu ku siiyo liis ugudbin
- aad adeegga khadka internetka ee Law Society of Upper Canada oo dooro inaad samayso codsi khadka internetka ah (lsrs.lsuc.on.ca/lsrs/). Waxaad iman doontaa bogga ugudbinta LSUC. Guji dusha "find it here" oo ah "halkan ka hel" si aad u timaad bogga FAQ (Su'aalaha Badiyaa La Isweydiiyo). Hoos u dhaadhac bogga, oo dooro "next" ama ka xiga, oo buuxi dhowrka bog ee ku xiga. Hubi inaad ku dhigto meesha inaad raadinayso qareen, maya kalkaaliye-qareen. Waxaad heli doontaa iimayl wata magacyada qareenrada aad wici kartid.
- wac khadka telefoonka dhibaatada LSUC haddii aadan isticmaali karin adeeggooda khadka internetka (sababta oo ah, tusaale ahaan, xabsi adiga oo ku jira, adiga oo gabaad (shelter) ku jira ama beel fog deggan): **1-855-947-5255** ama **416-947-5255**
- weydiiso u gudbin xarun sharciyeedka beesha ee deegaankaaga (ka hel mid halkan: **legalaid.on.ca/clinics**)

## Doorashada qareenka kugu habboon

Su'aalahan ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato qofka ugu fiican ee suurtagalka ah:

- Waa maxay mawduuca sharci ee aad ku ku takhasustay? Adigu wa waxaad tahay qareen dambiyeed? Qareen qoys? Qareen Qaxooti?
- Intee in le'eg oo waayo-aragnimo ama aqoon ah ayaad ku leedahay arrimaha ku saabsan nooca kiiskayga?
- Waa sidan sida habboon ee aan rajaynayo inay dhacdo – sidaasi ma macquulbaa?
- Waa maxay fursadahayaga sharciyeed?
- Miyuu qof kale oo xafiiskaaga ka tirsani qaban doonaa qayb muhiim ah oo kiiskayga ah, sida imaanshaha maxkamadda?
- Waa halkee xafiiskaagu?
- Sideen adiga ayaan kuula soo xiriiri karaa?

**Talooyin kale oo dhowr ah:**

- Hubi in qareenka aad doorataa kugu habboon yahay. Legal Aid Ontario waa dhif inay kuu oggolaato beddelka qareenkaaga markaad qorato mid.
- Sii shahaaddada oo keliya, ama u dir lambarka shahaaddadaada, qareenka aad rabto inaad shaqaalaysiisato. Markaad sidaas samayso aad maxkamadda, waad shaqaalaysatay isaga ama iyada.
- Haddii ay qareeno kuu yimaadan marka aad maxkamadda joogto, adiga ayay kugu xiran tahay inaad shaqaalaysiisato. Waxaad xor u tahay inaad doorato qareenka aad doonto.
- Raadso qareen aad aammini karto inuu sheego dhammaan xaqiiqooyinka ku saabsan kiiskaaga, oo arrimaha si fiican ula socda kolba heerkay marayaan, oo kaala taliya fursadahaaga ugu fiican.
- Waxaa laga yaabaa in aad u baahato inaad la kulanto qareeno dhowr ah ka hor inta aad heleyso midka sida ugu wanaagsan baahidaada ula kulmaya.

## Qorsheynta kulankaaga ugu horreeya

**Ka hor iyo inta lagu jiro kulankaaga ugu horreeya:**

- Soo qaado dhammaan waraaqahaaga maxkamadda.
- Diyaarso liis su'aalo ah oo aad weyddiiso.
- Diyaar u ahow inaad u sharraxdo si fiican arrimo sharciyeedkaaga, oo xaddid tirada iimaylaad u dirayso iyo wicitaannada telefoonada ee aad u samaynayso. Shahaaddadaada ayaa siinaysa qareenkaaga saacado cayiman marxalad kasta oo kiiskaaga. Waqtiga lagu bixiyo iimaylada iyo ku hadalka telefoonka waxay ku tirsamayaan saacadahan, oo kaa isticmaalaysa wakhtiga u qareenku uu u istcimaali lahaa diyaarinta kiiskaaga.
- Soo qaado waraaq, si aad ugu qorto waxa u qareenku kuu sheego.
- Soo kaxayso qof kuu turjuma haddii qareenku aanu lahayn turjumaan.
- Kala hadal sida aad ula soo xiriri doonto iyo goorta aad la soo xiriiri doonto ka dib kulankan.
- Weyddii inuu qof kale qaban doono qayb muhiim ah oo kiiskayga ah, sida imaanshaha maxkamadda.
- Haddii aadan wax ka fahmin, weyddiiso sharaxaad.

**Waxaad ka filan kartaa inuu qareenkaagu kuu sharraxo:**

- tsharciyada ku aaddan kiiskaaga sharciyeed
- xuquuqdaada
- nidaamka maxkamadda
- inta ay qaadanayso xallinta kiiskaagu
- xaddiga natiijooyinka aad filan karto ee suuragalka ah
- halisaha la xiriira gorgortanka qirasho ee aad doorato inaad samayso (haddii ay tahay kiis dembiyeed)
- maxaa marka xiga dhacaya

Horay u soo wac haddii aadan imaan karin ballantaada, oo taariikh kale qabso.